

Dibed u baxa ama laydhsiga iyo wax dubashada

Xagaaga iyo cadceedda, iyada oo taambuug ama buudhi meel dibed ah lagu dhisto si loo dego hawo geddis awgeed. Dab la shido habeekee ama dhamac cunto lagu karinayo. Dabka la hubiyey ayaa wanaagsan. Lakkiin haddii aan dabka la kantaroolin waxa imanaysa gubasho. Sidaa arrintaas looga badbaadi karaa?



DIBED U BAXA AMA LAYDHSIGA

Dadka caadeysatay hawlaha firfircoonida ee guriga dibeddiisa ah waxay jecelyihiin in si xor ah ay dab u shitaan, qaar kale waxay jecel yihiin in ay soo qaataan madbakh weyn oo dabaysha celiya si ay u galaan haddii hawedu ay xumaato. Dadka fasaxooga xagaaga ku qaata aqlka buudhiga ee la jiido ama doonmidu badanaa waxay samaystaan madbakh gaaska wax lagu karsado. Xaggan hoose waxaad ku helayaa dhowr talo ama tilmaan oo ku saabsan sidii aad uga badbaadi lahayd dhibaato kugu dhacda.

DABKA CAADIGA AH EE OLOLA

Marka ugu horraysa waxa muhiim ah in la helo meel fiican oo dabka lagu shito. Badnaa waxa jira meelo loogu talo galay dab shidka oo ku yaalla jasiiradaha yaryar iyo meelaha la tamashleeyo.

Haddii meelahaasi aanay jirin waxaad dooranaysaa meel deggan oo ammaan ah oo sida ugu macquulsan biyaha ugu dhow. Waxaad ku dhistaa bataax iyo dhagaxaan. Marnaba si toos ah dab ha ku shidin buuraha hoostooda.

Haddii ay dabayli dhacayso waxa jirta khatar ah in dhimbiiluhu ay fidaan. Hubi oo eeg in aan haba yaraatee wax dhimbiil ama dharo ahi ay u duushay xagga dhulka ama kaynta. Marka la samaynayo baadhista khatarta dabka ee 5 waxa talo lagu soo jeedinayaa mamnuucid dabka ah. Bakhtii dabka inta aanad meesha ka tegin!

SHAWLADDA ISBIIRTADA LAGU SHIDO

Waxa jira dareere deegaanka u fiican oo aan dambas lahayn ama cuntada aan dhadhan xun u yeelayn. Buuxi isbiirta gubaha ilaa xaddiga mugga ee 2/3. Marnaba ha ka-buuxin isbiito gubaha ka hor inta aanu si buuxda u bakhtiyin ee aanu u qaboobin.

GAASKA LA SHITO

Gaaska la shito waa in si foorjigan oo ixtiraam leh loo maareeyaa. Haddii uu meel daloosha ka soo liigo taasi waxay keenaysaa qarax iyo gubasho labadaba. Qalbka cusub ee la isticmaalo wixii ka dambeeyey 1995kii waa in uu lahaadaa

calaamadda CE-märkt. Ka fikir fantilayshannada haddii shawladda gaaska aad ku isticmaasho guriga yar, doonnida iyo guriga buudhiga ee la jiito. Si looga digtoonaado liigis ama showladda oo meel gaaska sii deysa ayaa waxa gaaska lagu daraa maaddo ur kulul leh, maaddo midab huruud ah leh oo ur kulul. Xidh shawladda oo laydhi isla marka aad adreento wax yar oo urta qodhmuun ah. Meesha liigaysa waxa lagu hagaajin karaa iyada oo la adeegsanayo "shayga lagu buufiyo liigista" Hubi oo eeg in meeshii liigeysay ay awdantay si foogjanna u tijaabi meeshii liigaysey ee gaaska soo deynseysey.

Aqoon badan oo dheeraad ah oo ku saabsan gaaska la shito waxa laga soo qaadan karaa qoraalka ay leeyihiin ururka Gaaska ee Iswidhishka ee "Marka hore fikir-dabadeed ku shid: gaasta guriga yar, guriga buudhiga ee la jiido, guriga baabuurka ee la jiido iyo doonnida xilli firaqaha" Waxa kale oo warbixinta laga helayaa qoraalka iyo talooyinka guud ee ku saabsan gaaska la shito ee leedahay Hey'adda badbaadinta guriga buudhiga ee la jiido.

QALABKA DIGNIINTA DABKA

Qalabka digniinta dabku waa caymis nololeed oo jaban haddii xitaa la dhex dhigto guriga buudhiga ee la jiido iyo doonnida. Wuxuu kaaga digayaa oo uu sheegaa qiqa halista ah.

DABDEMIYAHA GACANTA

Marka taambuug ama buudhi meel dibed ah lagu dhisto si loo dego hawo geddis awgeed, guriga buudhiga ee la jiito ama doonnida ayaa waxaannu ku talinaynaa in meelahaas lagu haysto dabdeemiye budo ah oo ugu yaraan ah 3 kiiloo garaam. Dabdeemiyaha waa in uu ka ansaxsanaadaa oo ay oggolaanya SIS ama mid kale oo ka mid ah xubnaha kale ee ansaxiyayaasha ee SWEDAC. Ugu yaraan waxaannu idinkula talinaynaa heerka A-klass 13 iyo heerka B-klass 113, laakiin had iyo jeer waxa ka fiican in la haysto dabdeemiye wax qabadkiisu yahay heerka sare.

Dab gubanaya kantarool la'aan, waxa la yidhaa dab. Ha sugin qaylo dhaanta – toos u wac 112

HADDII AY WAX GUBTAAN – HAD IYO JEER WAC 112

Ururka iswidhishka ee ka hortagga dabku waa urur xubin laga noqdo oo ka shaqeeya dab bakhtiiinta Iswidhan. Annaga oo adeegsanayna warbixin iyo waxbarasho ayaannu ka caawinnaa sidii dadka, shirkadaha iyo ururradu ay u qaadi lahaayeen mas'uuliyadda ka saaran ka hortagga dabka. Lambarka **telefoonka ee 08-588 474 00. www.svbf.se**